

# Ka feejignoow, Iska ilaali oo Soo sheeg Tuugada

## Buugga Sifooyinka Tuugada

**oo loogu talagalay Qaxootiyaasha iyo Soo  
galootiga wadanka Ku cusub**

Gudigga Ganacsiga ee Federaalka (Federal Trade Commission, FTC) waa wakaalada dawlada ee ka difaacda dadka khiyaanada iyo tuugada.

Halkaan ayaad ka helaysaa qaar kamid ah astaamaha digniinta leh ee tuugada. Haddii aad aragto wax kamid ah calaamadahaan, joogso. Ka hadal.

Haddii lagu qiyaamay ama aad u maleyneyso inaad qiyaano aragtay, wac 877-382-4357, oo riix 3 si aad u hesho luuqado kale, kadibna riix 0 si aad u hesho luuqado dheeraad ah— ama booqo **[ReportFraud.ftc.gov](https://www.ftc.gov/report-fraud)**.

# Astaamaha Digniinta ee lagu Garto Tuugada.

---

## **Qof ma kuu ballan qaaday shaqo – haddii aad lacag siiso?**

Marna ha siin lacag qof kuu ballan qaaday inuu ku siinaayo shaqo, shahaado aad shaqo ku helayso, ama inaad si gaar ah ku helayso shaqo. Dadkaas waa tuugo.

## **Qof ma kuu sheegay inuu ka socdo wakaalad dawladeed, kadibna ma kuu hanjabay ama ma kaa dalbaday lacag?**

Dawladu kumasoo wacayso si ay kuugu hanjabto ama kaaga dalbato lacag.

## **Qof ma kuu sheegay inuu kaa caawin karo inaad ku guulaysato Fiisada Bakhtiyaa Nasiibka ah ama Kaarka Daganaansha (Green card)?**

Waa lacag la'aan inaad codsato dadka ku guulaystana waxaa lagu xushaa qaab qori tuur ah. Ma jiro qof kordhin kara fursadaada guulaysiga.

## **Laan nootaayo bixisa miyay kuu yaboohday inay kaa caawinayso aqoonsigaaga soogalootiga?**

Haddii aad u baahan tahay talo sharci oo ku saabsan aqoonsigaaga soo galootiga, u tag qareen ama wakiil aqoonsi haysta. Marna ha u raadsan nootaayo.

## **Miyaad heshay wicitaan, iimeel, fariin qoraal, ama fariinta baraha bulshada oo kuu sheegaysa inaad wax ku guulaysatay? Laakiin aad u baahan inaad lacag bixiso si lagu siiyo?**

Ha bixin lacag lagu leeyahay abaal marin ayaad ku helaysaa. Waa tuugo. Waad waayi doontaa lacagtaada.

## **Qof ma kaa dalbaday inaad lacag ku bixiso kaarka hadiyada, xawaaladaha lacagta sida Western Union ama MoneyGram, ama cryptocurrency?**

Keliya tuugada ayaa codsada inaad lacagta sidaas ku bixiso. Haka yeelin.

## Miyaad ka heshay jeeg qof kaa codsaday inuu lacagta qaar ku siiyo?

Qof haku siin lacag si aad ugu abaal gudo jeeg uu ku siiyay. Jeegaga been abuurka ah ayaa u muuqan kara kuwo run ah oo lagu khaldi karaa bangiga. Waxaa qasab kugu noqon doonta inaad lacagta dib u bixiso.

## Miyaad heshay wicitaan, iimeel, fariin qoraal, ama fariin baraha bulshada laguugu soo diray oo kaa dalbanaysa kaarkaaga daynta, kaarka baanka, ama lambarka Social Security?

Ha siin xogta qof kaaga codsanaaya khadka taleefanka, iimeel, fariin qoraal, ama baraha bulshada.

## Difaac naftaada iyo xogtaada

---

- Ha qaadan dukumiintigaaga muhiimka ah ama kaararka aqoonsiga.
- Ha gujin lifaaqyada kujira iimeellada, fariin qoraallada, ama fariimaha baraha bulshada ilaa aad hubto maahee waxa ay yihiin.
- Ha aaminin aqoonsiga qofka ku soo wacay. Tuugada ayaa magaca ama lambarka ay doonaan u adeegsan kara si ay iskaga dhigaan aqoonsiga wacaha.
- Ha u dirin lacag qof kasta oo ku soo waca, iimeel kuu soo dira, ama fariin qoraal kuu soo dira kuuna sheegaaya inuu dawlada ka socdo.
- Astaanta dawladu kama dhigna in webseedku yahay mid rasmi ah. Ka fiiri [.gov](https://www.gov.gov) ciwaanka webseedka.
- Marna lacag haku bixin foomamka socdaalka ee dawlada Maraykanka. Waa lacag la'aan.
- Haddii aad isleedahay qof ayaa xaday aqoonsigaaga, booqo [IdentityTheft.gov](https://www.identitytheft.gov) si lagu caawiyo.

# Ku sheeg qiyaanooyinka

Guddiga Ganacsiga ee Federaalka

**ReportFraud.ftc.gov** ama wac

877-382-4357, oo riix 3 si aad u hesho  
luuqado kale, kadibna riix 0 si aad  
u hesho luuqado badan.

## Maxaad u soo sheegaysaa xogta tuugada?

Warbixintaada ayaa gacan ka gaysanaysa difaaca dadka aad ka naxayso. Waxay ka caawinaysaa FTC inay xirto tuugada waxayna ka difaacaysaa dadka kale in tuugadu dhacdo.

Xog badan ka ogoow sida la  
iskaga ilaaliyo tuugada:  
**consumer.gov**



Federal Trade Commission

consumer.gov

Agoosto 2022

August 2022